


Hay'adda Istaatistikada Qaranka (HIQ)



**TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA**

**Maajo 2021**

## Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bisha Maajo 2021 ayaa ahaa 126.42, marka la barbardhigo 124.85 bishii Abriil 2021.

Isbedel bileedka, Maajo 2021, marka la barbar dhigo Abriil 2021, ayaa hoos u dhacay 1.26 boqolkiiba. Tan ayaa imaanaysa, marka labarbardhigo sare u kac bille ah oo gaaraya 1.94 boqolkiiba bishii Abriil 2021. Sare u kac bileedka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha **dharka & kabaha** (5.02%). Qiima kororka ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha dharka oo gaaray (+5.70%). kor u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha qeybaha kale ee dharka (+11.30%) iyo dharka dumarka (+7.32%) (Jaantuska 2)

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay (Maajo 2020 iyo Maajo 2021, heerka sicir bararka) ayaa muujinaya in dhammaan qeybaha TSB uu hoos u dhacay 3.83 boqolkiiba, Marka la barbardhigo 4.21 boqolkiiba ee 12kii bilood (Abriil 2020 iyo Abriil 2021).

### Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Maajo 2021 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Maajo 2021	
Tusaha bishan (Maajo 2021)	126.42
Tusaha bishii hore (Abriil 2021)	124.85
Tusaha sanadkii hore (Maajo 2020)	121.76
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	1.26%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	3.83%

### Heerka Sicir Bararka Marka loo eego

### TSB Tixraaca

Isbedel Boqoleyda ee 12Bilood

Index = 100 @ December 2014



Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Maajo 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

## Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Maajo 2021

### Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Maajo 2021

Heerka sicir-bararka bisha Maajo 2021 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, Maajo 2020 iyo Maajo 2021.

**Dhammaan qeybaha TSB** ayaa hoos u dhacay 3.83 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Maajo 2021 iyo Maajo 2020, marka la barbardhigo 12kii bilood ee Abriil 2020 iyo Abriil 2021 oo ahaa 4.21 boqolkiiba.

**Dhammaan qeybaha TSB isbedelka** billaha ah ayaa hoos u dhacay 1.26 boqolkiiba bisha Maajo 2021, marka labarbardhigo sare u kac dhan 1.94 boqolkiiba bishii Abriil 2021.

### Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Maajo 2021.


Sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay dhammaan qeybaha TSB.

**Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda bilaha ahi sare u kacay 1.36 boqolkiiba, inta lagu jiray bisha Maajo 2021. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada quutul daruuriga ah oo qiimahoodu sare u kacay. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos dhacay -1.98 boqolkiiba Maajo 2021. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray -1.91 boqolkiiba Abriil 2021.

**Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska** ayaa laga dareemay sare u kac bille ah oo dhan 0.86 boqolkiiba intii lagu guda jiray Maajo 2021, marka la barbardhigo sare u kac gaaraya 0.58 boqolkiiba bishii Abriil 2021. Sare u kaca sanadlaha ah ee bisha Maajo 2021 ayaa gaaray 12.03 boqolkiiba, marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah ee bishii Abriil 2021 oo ahaa 12.00 boqolkiiba.

### Dhammaan qeybaha TSB & Qeybaha la doortay

Index = 100 @ December 2014




Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Maajo 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

## A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Maajo 2021 (Dec 2014 = 100)



### Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Caafimaadka** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah oo gaaraya 20.34 boqolkiiba bishii Maajo 2021. Sare u kaca waxa sababay qiima koror ku yimid adeega Cusbitalada oo gaaray (+45.79 boqolkiiba). Sare u kaca ayaa ka yimid adeega daweynta bukaanada oo noqday (+150.00 boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 12.87 boqolkiiba Maajo 2021. Sare u kaca waxaa sababay daryeelka shakhsi ahaaneed oo qiimahoodu gaaray (+17.66 boqolkiiba). Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Tima hagaajinta saloonka iyo qurxinta aroosyada (+23.00 boqolkiiba).
- **Dharka iyo Kabaha** ayaa sicirkooda sanadlaha ahi sare u kacay 12.13 boqolkiiba. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha dharka (+14.47 boqolkiiba) sare u kaca waxa sababay qiimaha koror ku yimid dharka raga (+22.44 boqolkiiba) iyo dumarka (22.12 boqolkiiba) iyo qeybaha kale ee dharka (+18.98 boqolkiiba).
- **Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska** ayaa muujiyey sare u kac Sanadle ah oo gaaraya 12.03 boqolkiiba bisha Maajo 2021, sare u kaca ugu weyn ayaa ahaa qiimaha kirada guryaha (+19.67 boqolkiiba). Biya gelinta iyo adeegyada dheeraadka ah ee la xiriira guryaha (+24.31 boqolkiiba) qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha ay bixiyaan kireystayaasha sida, Apartment-ga (+30.23).
- **Agabka Guryaha, Qoysaska iyo Dayactirka** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah 8.64 boqolkiiba ee Maajo 2021, Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid agabka guryaha (+14.34 boqolkiiba).
- **Hawo bedelashada & dhaqanka** ayaa sameeysay sare u kac sanadle ah oo gaaraya 5.29 boqolkiiba Maajo 2021. Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid maqal-araga, sawirada iyo agabka lagu soo saaro warbixinada oo gaaray (+6.21 boqolkiiba). Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid cable TV (+11.11 boqolkiiba) iyo dhalooyinka la daawashadda +16.67 boqolkiiba.


### Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Maajo 2021 (-)

- Guud ahaan, majirin qeybaha TSB sare u kac la taaban karo oo bille ah Maajo 2021.

War bixin bileedka bisha **Maajo 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

## B. Qeybaha ugu weyn ee saameeya TSB -da

Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Maajo 2021 (Dec 2014 = 100)



### Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Maajo 2021 (+)

- **Dharka iyo Kabaha** ayaa sicirkooda sare u kacay 5.02 boqolkiiba intii lagu guda jiray bishii Maajo 2021 . dharka iyo kabaha yaa sababay qiima kororka ku yimid qiimaha dharka (+5.70 boqolkiiba) sare u kac ku yimid qeybaha kale ee dharka (+11.30%) iyo dharka dumarka (+7.32%).
- **Caafimaadka** ayaa sare u kacay 2.09 boqolkiiba intii lagu guda jiray bishii Maajo 2021 halka 1.37 la diiwaan galiyey bishii Abriil 2021. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay adeega bukaan socodka oo gaaray (+4.77 boqolkiiba).

### Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Maajo 2021 (-)

Guud ahaan, majirin qeybaha TSB sare u kac la taaban karo oo bille ah Maajo 2021.

War bixin bileedka bisha **Maajo 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

**Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Maajo 2021 ee habka (COICOP)**

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Maajo 2020 TSB	Abriil 2021 TSB	Maajo 2021 TSB	% Boqolkiiba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiib Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
<b>Dhamaan qeybaha TSB</b>	100.00	121.76	124.85	126.42	1.26	3.83
Cuntada & Cabitaanada caadiga ah	46.04	132.03	127.68	129.42	1.36	-1.98
Tubaakadda	1.25	137.08	128.44	128.44	0.00	-6.30
Dharka & Kabaha	5.03	138.76	148.16	155.60	5.02	12.13
Guryaha, Biyaha, Korontada & Gaaska	23.41	104.75	116.35	117.36	0.86	12.03
Agabka Guryaha	2.93	103.70	112.65	112.65	0.00	8.64
Caafimaadka	5.00	132.12	155.73	158.99	2.09	20.34
Gaadiidka	3.77	110.83	109.65	109.65	0.00	-1.06
Isgaarsiinta	2.80	101.31	103.03	103.03	0.00	1.70
Hawo bedeshada & dhaqanka	1.00	98.54	103.75	103.75	0.00	5.29
Tacliinta	4.00	107.75	109.80	109.80	0.00	1.91
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	136.61	138.44	138.44	0.00	1.35
Alaabaha yaryar & Adeegyada	2.77	110.86	125.12	125.12	0.00	12.87

**Ogeysiis:**

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.

**Soo saarida tan xigta**


Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Juun 2021 waxaa la baahin doonaa 15 Juulay 2021. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga ah kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

War bixin bileedka bisha **Maajo 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistiskada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

**Lifaaqa 1aad: Dhammaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Maajo 2021 marka loo eego COICOPka**

**Dhammaan qeybaha TSB**

Qeybaha ka qeybqaata (%) Heerka sicir bararka ( COICOP)



Isha xogta: NBS

**Lifaaqa 1aad** wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee bisha oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadsooda) dhamaan qeybahaha 'TSB' ka.

War bixin bileedka bisha **Maajo** 2021 (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia